IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 15aad, Muqdisho, 31 Oktoobar 1987, 1 R 10

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanaddii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 28 Sebt. 1987, Heshiis Amaaheed ee dhex maray JDS iyo Sanduuqa OPEC ee Horumarinta Caalamiga. Bog; 813

SHARCI L. 21 ee 8 Okt. 1987, Masawirka rasmiga ah ee Xoghayaha Guud XHKS, Madaxweynaha J.D.S. » 814

SHARCI L. 22 ee 10 Okt. 1987, Oggolaansho Heshiiska Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nation Convention on a code of conduct for liner conferences). » 815

## QAYBTA LABAAD

### X E E R


XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 42 ee 28 Sebt. 1987, Meel-marin Heshiiska Amaaheed ee dhex maray JDS iyo Sanduuqa OPEC ee Horumarinta Caalamiga. » 816

DECREE No. 42 on 28 Sep. 1987, Instrument of ratification. » 817

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 43 ee Okt. 1987, Meel-marin Heshiiska Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badana. » 818

DECREE No. 43 on 10 Oct. 1987, Instrument of ratification. » 819

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 44 ee 23 Sebt. 1987, Magacaabid iyo Dib u celin Saraakiil. » 820

XEER WASAARADDA LACAGTA L. 13 ee 25 Sebt. 1987, Dhismaha Xafiis Furdo ee Baraawe. » 821


## QAYBTA SAD/XAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO W.M.


DAWLADDA HOOSE MUQ. 20.7.85, Naado Dhul J.le Abuu Xaaji Cumar L. 294 » 822

DAWLADDA HOOSE MUQ. 20.7.85, Naado Dhul J.le Abay Xaaji Awow L. 295 » 823

DAWLADDA HOOSE MUQ. 20.8.85, Naado Dhul J.le Seef Amiin Xaaji L. 296 » 824

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 17.9.87, Lumid Jeeg War. L. 0507985 ku qoran Calanle Muuse Maxamed L. 297 » 825

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.10.87, Lumid Buug Kayd L. 1042 ku qoran Cabdullaahi Xaashi Cali L. 298 » 826

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.10.87, Lumid Jeeg War. L. 0380199 ku qoran Cali Sheekh Cusmaan L. 299 » 827

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.10.87, Lumid Jeeg War. L. 03801120 ku qoran Baab Shaacir Aboow L. 300 » 828

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 28.9.87, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Ciise Boondhle Yuusuf, Yuusuf C/hi, Ismaaciil Maygaag L. 301 » 829

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.10.87, Lumid Jeeg War. L. 0306534 ku qoran Cali Maxamed Abuukar L. 302 » 830

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.10.87, Lumid Jeeg War. L. 0006878 ku qoran Dr. Axmed Haaruun Aadan L. 303 » 831

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.10.87, Lumid Jeeg War. L. 0003244 ku qoran Dr. Axmed Haaruun Aadan L. 304 » 832

MAXKAMADDA G. W/GALBEED. 22.9.87, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cismaan Cabdi L. 305 » 833

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.10.87, lumid Jeeg War. L. 0386672 ku qoran Maxamuud Cabdi Xersi L. 306 » 834

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 26.10.87 lumid Jeeg War. L. 0013664 ku qoran Cali Yoonis Maxamed L. 307 » 835

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 28.9.87 lumid Jeeg War. L. 0501389 ku qoran Garaad Cismaan Maxamed L. 308 » 836

MAXKAMADDA G. TOG./BURCO, 14.3.87 Lumid Jeeg War. L. 0379631 ku qoran Cabdiqaadir Maxamed Cabdille L. 309 » 837

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARBEYSA, 30.8.87, Lumid Jeeg War. L. 742809 ku qoran Maxamed Iidle Aabi L. 310 » 838

QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharciga Lam. 20 taariikh 28.9.87 Heshiis Amaaheed oo Dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa OPEC ee Horumarinta Caalamiga.

MADAXWEYNAHA J.D.S,

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiiskan dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta OPEC ee Caalamiga kuna saabsan Amaah Lacageed oo dhan 6.000.000 oo loogu tala galay taageerada dheelitirka Miisaaniyadda Dibadda.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Vienna ee Dalka Uostria 29kii Luulyo 1987.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada heshiiska

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla markuu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Seb. 1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 21 taariikh 8 Okt. 1987, Masawirka rasmiga ah ee Xoghayaha Guud XHKS, Madaxweynaha J.D.S.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

BEDDELKA MASAWIRKA

Waxaa la beddelay Masawirka Xoghayaha Guud ee XHKS Madaxweynaha J.D.S. oo ay ku qornaaneed (Major General Mohamed Siyad Barre, President of the Supreme Revolutionary Council of the SDR), waxaana lagu beddelay Masawir rayad ah oo ay ku qoran tahay (XOGHAYAHA GUUD EE XHKS, MADAXWEYNAHA J.D.S. J/le MAXAMED SIYAAD BARRE) kuna qoran afafka rasmiga ah ee J.D.S. Soomaali iyo Carabi.

Qodobka 2aad

ASTAANTA RASMIGA AH EE MASAWIRKA

Masawirka midabkiisu waa caddaan iyo madow, dheerir kiisu waa 60 cm, ballarkiisu waa 50 cm. Masawirku waa qaar ka sare iyadoo uu Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha J.D.S. gashan yahay koor madow iyo qoor xir barabara leh.

Qodobka 3aad

DHAQANGAL

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 beri kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda wuxuuna ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka.

Muqdisho, 8 Okt. 1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 22 taariikh 10,10.87: Oggolaashaha Heshiiska Qarammad Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nation Convention on a code of conduct for liner conferences).

.MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska Qarammada Midoobay ee Gaadiidka Badda (The United Nationa Convantion on a code of conduct for liner conferences) ee ka dhexeeya Waddamada Xubnaha ka ah Qarammada Midoobay ee meelmariyey isla Heshiiskan.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Jeneefa 6dii Abriile 1974.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci ee la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Sharciyada iyo Dastuurka J.D. Soomaaliya.

Qodobka 3aad

.Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.10.1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 42 taariikh 28 Seb. 1987 Meel marinta Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa OPEC ee horumarinta Caalamiga.

MADAXWEYNAHA J.D.S:

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 20, ee 28.9.87 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta heshiiska ujeeddada ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel mariyo heshiiskan.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa OPEC ee Horumarinta Caalamiga oo lagu kala saxiixday magaalada Vienna ee Dalka Uostria, loo guna tala galay taageeradda dheelitirka Miisaaniyadda D/da

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Seb. 1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Decree no 42 of 28 Seb. 1987 Instrumenta of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 ond the Article 82, Para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no 20, 28.9.87 of on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREEY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Balance of payments Support Loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the OPEC FUND for International Develompent, signed in Vienna (Austiria) on July, 29, 1987, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 28 Eeb. 1987

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 43 taariikh 10.10.87 Meelmarinta Heshiiska Qarramada Midoobay ee Gaadiidka Badda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 25ka Desember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 22 ee 10ka Okt. 1987 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska Qarammada Midoobay ee Gaadiidka Badaha oo lagu guddoonsaday magaalada Jenee fa 6dii Abriile 1974.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. Awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10.10.1987.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Decree no. 43 of 10.101987: Instrument of ratification

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Re public;

HAVING SEEN: the Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 22 of 10 October 1987, on the base of which the People's Assembly has approved the Convention specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: the necessity to ratify this Convention;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article 1

The United Nations Convention on a code of conduct for liner conferences, adopoted in Geneva on April, 6 1974, by the United Nations Conference of Plenipotentiaries on a code of conduct for liner conferences, is hereby ratified.

Article 2

This Convention shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10.10.1987

THE PRESIDENT OF SDR
(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 44 ee 23 Sebt. 1987: Magacaabid iyo dib u celin Saraakiil.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 3 soona baxay 10kii Janaayo 1970kii, kuna saabsanaa dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii bedelaad ku dhacay;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, Tirsigeedu yahay 593/MD1/87 ee 22.9.1987;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

G/le Sare Abshir Saalax Maxamed oo ahaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka, waxaa dib loogu celiyey Taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo uu ka tirsan yahay.

Qod. 2aad

G/le Sare Nuur Xasan Xuseen, waxaa si ku meel-gaar ah loogu magacaabay Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 23 Set. 1987

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 56
Muqdisho, 1 Sep. 1987
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA LACAGTA L. 13 ee 25 Sebt. 1987·
Dhismo Xafiis Furdo ee Baraawe.

W A S I I R K A

MARKUU ARKAY: Dastuur J.D.S;

MARKUU ARKAY: Qodobka 40 Xarafka D) ee Xeer-Sharci L. 1 ee 31.3.1961 Nidaamka Furdada;

MARKUU ARKAY: Xeer-Madaxweyne L. 316 ee 17.12.62, kuna saabsan Dhismaha Guud ee Xafiisyada Dhexe ee Dawladda;

ISAGOO GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in laga dhiso Degmada Baraawe Xafiis Furdo.

WUXUU XEERIYAY

Qod. 1aad

Waxaa laga dhisay Magaalada Baraawe Xafiis Furdo oo lagu maamulo hawlaha la xiriira badeecadaha uga yimaada xagga badda.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 25 Setembre 1987

WASIIRKA LACAGTA
(Dr. Cabdullaahi Warsame Nuur)

**QAYBTA SADDEXAAD**

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO W.M.

DAWLADDA HOOSE E XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Abuu Xaaji Cumar uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 14 6.85 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho, Degmada Shibis Qaabkiisu yahay Retangolare Addimihiisuna yihiin 15X12 kuna fadhiya mq. 180

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 20 Jul. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE
**(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)**

L. 294

Waxaa la caddeynayaa in J.le Abay Xaaji Awow Cabdalla ay soo qoratay Arji una soo qoratay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25.3.85 ay ku soo weydiisatay gabal dhul Daw ladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu yahay Afar Gees Isle'eg Addimihiisuna yihiin 12X12 kuna fadhiya mq. 144.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Caasha Xaaji Awow Cabdalla

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 20 Jul. 1985
AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 295

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seef Ammin Xaaji Cali uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taar. aheyd 16.7.1985 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare adimihiisuna yihiin 30,20X16,50 kuna fadhiya 498,30/=

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koofur waxaa ka xiga : Guriga Ismaaciil

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga Waddo

Qofkii danaynayaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdsiho 20.8.85

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 296

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO
UJ: Baafin Jeeg Wareega ee Lambr 0507985.

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/War. ee Lumay.

MARKUU ARKAY: In uu Lumay J/War. ee Lam. 0507985 kuna jirtay Lacagta dhan Sh.So 50.000.

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. ee Lambar kor ku xusan yahay oo laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qornaa Calanle Muuse Maxamed 27 8.87 kuna jirtay Sh.So. 50.000 kana lumay JaalleCartan Aw Yuusuf.

WUXUU LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J/le Cartan Aw Yuusuf Lacagta dhan sh.so. 50.000 oo ah bedelkii J/War. ee Lumay ee kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 20 casho laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan la keenin wax is hortaag ah

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO
Dr. Abuukar Islaw Cumar

L. 297

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Xasan Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay B/Keyd Lam. 1042 kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 85.833/71 kuna qoran ma gaca J/le Cabdullaahi Xasan Cali sida ku cad warqadda Lam. 002692 Tr 10.10.87iyo iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xamar.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lam. 1042 Ba nkiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 85.833/71 kuna qoran magaca J/le Cabdullaahi Xasan Cali.

WUXUU LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xamar in ay siiso J/le Cabdullaahi Xasan CaliLacagta cad deyntu tahay Sh.So 85.833/71 oo ah Beddelkii B/Keydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.10.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 298

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Sheekh Cusmaan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay Jeeg War. Lambar

0380199 kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J/le Cali Sheekh Cusmaan sida ku cad warqad da Lam 17804 Tr. 8.10.86 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. ee Lambar 0380199 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta .Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So 100.000 kuna qoran magaca J/le Cali Sheekh Cusmaan.

WUXUU LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Jilib in ay siiso J/le Cali Sheekh Cusmaan lacagta caddeyn tu tahay Sh.So 100.000 oo ah beddelkii B/Keydka kor ku qo ran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maal mood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.10.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 299

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Baab Shaacir Aboow.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lam 0381120 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Abuukar Maxamed Caliyow sida ku cad warqadda Lam. 17797 Tr. 8,10,87 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. Sharci Lam. 2 ee Tr. 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. ee Lambar 0381120 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Abuukar Maxamed Caliyow.

WUXUU LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye in ay siiso J/le Baab Shaacir Aboow lacagta caddeyntu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii B/Keydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.10.87.
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr Cabdullaahi Axmed Xaashi

L 300

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA
MGH/34/87 HARGEYSA 28.9.87

UJ: Degreeto Cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee lumay Lambarradoodu kala yihiin:-

1) 0890406 ee 1.8.87 Sh.So. 100.000/= ku qoran Ciise Boodhle Yuusuf, laga sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa.

2) J.W. 0361291 ee 15.8.87 Sh.So. 50.000/= ku qornaa Yuusuf Cabdullaahi Liin, laga sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa.

3) J.W. Lr. 370794 ee 28.7.87 Sh.So. 50.000/= ku qornaa Ismaaciil Maygaag laga sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MARKUU ARKAY: Arjiga ah Codsiga ee uu soo qortay C/raxmaan Axmed Wacays ee uu ku Codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee lumay ee kor ku xusan, arjigaasi oo ku taariikhaysan 22.9.87;

MARKUU ARKAY: Taarka uu Bangigu Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray ee ku taariikhaysan 10.9.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa Laanta 1aad ee lambarkeedu yahay ku taariikhaysan 26.9.87 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in ay Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee ujeedada ku xusani ay leeyihiin Astaamaha Ujeedada ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In uu Lacagta Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay C/raxmaan Axmed Wacays;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee Ujeedada ku xusan la kansal gareeyo loona Cusboonaysiiyo C/raxmaan Axmed Wacays, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaasi Wareega ee lumay ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

KAALIYAHA MAX. G. W/GALBEED
(Xabiib Aadan Bile))
L. 301

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Maxamed Abuukar.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lam. 0306534 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Cali Maxamed Abuukar sida ku cad warqadda Lam 17934 Tr. 12,10,87 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee Tr. 9,9,1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jaag War Lambar 0306534 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Lanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Cali Maxamed Abuukar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J/le Cali Maxamed Abuukar lacagta ca deyntu tahay Sh,So. 50.000 oo ah beddelkii B/Keyka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J.D.S Haddii inta ka horaysa wax ishortag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 13.10.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 302

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 0006878 kuna jirto lacag dha sh,so, 70.000 kuna qoran magaca J/le Xabiiba Axmed Haaruun Aadan sida ku cad warqadda Lam. 6403 iyo keydka Soomaaliyeed L/Bankiga Dhexe. Axmed Haaruun Aadan sida ku cad warqadda lam 6403 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Bankiga Dhexe.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee Tr. 9,9,1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jaag War Lambar 0006878 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Lanta Bankiga Dhexe kuna jirto lacag dhan Sh,So, 70.000 kuna qoran magaca J/le Xabiiba Axmed Haaruun Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Bankiga Dhexe in ay siiso J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan lacagta caddeyntu tahay Sh,So, 70.000 oo ah beddelkii B/K. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 14.10.87

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 303

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War Lr. 0003244 kuna jirto lacag dhan sh,so, 21.650 kuna qoran magaca J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan sida ku cad warqadda lam. 6403 iyo keydka Soomaaliyeed L/Bankiga Dhexe.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee Tr. 9,9,1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jaag War Lambar 0003244 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Lanta Bankiga Dhexe kuna jirto lacag dhan Sh,So, 21.650 kuna qo ran magaca J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Bankiga Dhexe in ay siiso J/le Dr. Axmed Haaruun Aadan lacagta caddeyntu tahay Sh,So, 21.650 oo ah beddelkii B/K. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddi inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 14.10.87

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 804

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA
MGH/33/87 HARGEYSA 22.9.87

UJ: Degreeto Cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee lumay Lambar kala yahay:-

1) 889820 ee 19.9.87 Sh.So. 100.000/=.

2) 518530 ee 27.8.87 Sh.So. 50.000/= kuna wada qornaa Maxamed Cismaan Cabdi laga wada sameeyey Laanta laad ee Hargeysa.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay ninka la yiraa Xuseen Cige Faarax ee ku taariikhaysan 19.9.87 ee uu ku Codsanaayo in dib loogu Cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa ee ku taariikhaysan 10.9.87 ee uu Bangigu u kala diray laamihiisa iyo xisaabaha guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa ee Lambar yahay 000905 ee ku taariikhaysan 21.9.87 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in ay Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani ay leeyihiin Astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In uu Lacagta Jeegaggaasi Wareega ee kor ku xusan uu iska leeyahay Ninka la yiraa Xuseen Cige Faarax;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

## WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona Cusboonaysiiyo Nuuka la yiraa Xuseen Cige Faarax, cusboonaysiintaaa gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib marka Faalinta lagu soo saaro.

## WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GALBEED
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

KAALIYAHA MAX. G. W/GALBEED
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 305

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Maxamuud Cabdi Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0386672 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Xaaji Badawi Boosaar sida ku cad warqadda Lr. 18035 Tr. 14.10.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0386672 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca J.le Xaaji Badawi Boosaar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyoKaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe in ay siiso J.le Maxamuud Cabdi Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000/= oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.10.87

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 306

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cali Yoonis Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0013664 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000/= kuna qoran magaca J.le Ibraahim Cali Cabdi sida ku cad warqadda Lam. 18577 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis_Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0013664 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000/= kuna qoran magaca J.le Ibraahim Cali Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Hargeysa in ay siiso J.le Cali Yoonis Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.10.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Kaahin)

L. 307

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/252/87 Burco, 28.9.87

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega ee lam. 0501389 Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee lumay lam. 0501389 ee Sh.So. 35,000/=;

HADDUU ANKAY: Inuu lumay Jeegga Wareega ee lam. 0501389 ee Sh.So. 35,000/=;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. Sharci L. 2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeggaas Wareega ee lambarksu kor ku xusan yahay ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco Tr. 18.7.87 ee Sh.So. 35.000/= kuna qoran yahay J.le Garaad Cismaan Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco in ay siiso J.le Garaad Cismaan Maxamed Lacagta dhan Sh.So. 35.000/= oo ah bedelkii Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii intaa ka hor aan la keenin wax ishortaag ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Jaamac Cabdullaahi Bille)

L. 308

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/33/87 BURCO, 14.3.87

UJ:- Baafin Jeegga Wareega ee Lamb.0 379631

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee 14.3.87;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. (9.9.65 Lumid J gga Wareega ee Lamb. 0379631 ee Sh.So. 44.246 kuna qoran Cabdiqaadir Maxamed Cabdille.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J.le Cabdiqaadir Maxamed Cabdille markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah laguna shaaciyo xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro J.le Cabdiqaadir Maxamed Cabdille iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Dr. Abukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Jaamac Cabdillaahi Bille)

L. 309

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/24/87 Hargeysa, 30.8.87

UJ: Degreeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 742809, ee 7.7.87, lacagtiisu tahay 20.000/= ku qornaa Maxamed Iidle Aabi laga sameeyey Laanta Boorama.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay Cabdi C/llaahi Cumar ee ku taariikhaysan 27.8.87 ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Keydku ku kala diray laamihiisa ee ku taariikhaysan 1.8.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa ee ku taariikhaysan 27.8.87 ee lambarkeedu yahay 000785, ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in uu Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani leeyahay astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUUARKAY. In Lacagta ku qoran Jeeggaasi Wareega ee lumay uu iska leeyahay Cabdi C/llaahi Cumar;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegga Ujeedada sare ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo Cabdi Cabdillaahi Cumar, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata, muddo 15 maalmood gudahood ah.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 310

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Maxamuud Cabdi Rooble;

HADDUU TIXGELIYEY: In lumay Jeeg War. Lamb. 0875675 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Maxamuud Cabdi Rooble sida ku cad warqadda Lam. 002778 Tr. 28.10.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0875675 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Maxamuud Cabdi Rooble.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamuud Cabdi Rooble lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.10.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)